

Vermont health information exchange



Waa maxay waxaan?

Marka waa maxay Shabakada Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka ee Vermont?

Shabakada Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka ee Vermont waxay diiwaannadaada caafimaadka ku keydinaysaa hal meel oo aamin ah. Markaad la kulanto dhakhtar ama bixiye daryeel caafimaad oo qeyb ka ah, diiwaan elektaroonig ah ayaa loo diri karaa Shabakada Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka. Diiwaankan wuxuu diyaar u noqonaya dhakhtarka xiga ee aad la kulanto si ay u ogadaan taariikhdaada caafimaad. Dhakhtarkani wuxuu wax ku darayaa diiwaankaaga si markaa diiwaanka uu diyaar ugu noqdo dhakhtarka xiga, iyo sidaas si la mid ah.

Waxay macluumaad isku mid ah siineysaa adeeg bixiyeyaashaada.



Waa maxay xulashooyinkayga?

Hadda maadaama aad waxbadan ka ogaatay Shabakada Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka ee Vermont, aan ka hadalno xulashooyinkaaga.

Kaqeybgal

Haddii aad rabto inaad hesho faa'idada ah in dhammaan adeeg bixiyeyaashaada ay haystaan diiwaankaaga caafimaad, ma jiraan wax ay tahay inaad samaysid. Haddii adeeg bixiyeyaashaada ay qeyb ka yihiin adeegga, diiwaannadaada waxaa lagu wadaagi doonaa Shabakada Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka.

Hel macluumaad dheeraad ah ka hor intaadan go'aan gaarin

Dhakhtarkaaga ama bixiyaha daryeelkaaga caafimaad ayaa ka jawaabi kara su'aalaha ku saabsan Shabakada Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka. Ama waxaad ka wici kartaa Khadka Tooska ah ee Shabakada Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka

1-888-980-1243.

Ha ka qaybgalin

Waxaad dooran kartaa in macluumaadkaaga aan lala wadaagin adeeg bixiyeyaashaada. Tani waxaa loo yaqaan ka bixista adeega. Haddii aad ka baxdid adeega, diiwaankaaga waxaa lagu keydin doonaa Shabakada Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka. Laakiin adeeg bixiyeyaashaada ma arki karaan, marka laga reebo xaaladaha degdegga ah.

Si aad uga baxdid, booqo **VTHealthInfo.com** si aad u buuxiso ama u soo degsato foomka ka bixitaanka ama wac Khadka Tooska ah ee Shabakada Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka

1-888-980-1243.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid oo aad rabto inaad la hadasho ilo ka madax bannaan Shabakada Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka ee Vermont, Khadka Caawinta Udooodida Daryeelka Caafimaadka ka wac taleefanka 1-800-917-7787.



VTHealthInfo.com

Wixii su'aalo ah, Khadka Tooska ah ee Shabakada Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka ka wac taleefanka 1-888-980-1243.

Vermont
**health
information
exchange**



Maxaa ku jira diiwaankayga?

- Diiwaanka bukaanka waxaa ka mid noqon kara:
- Xogta bukaanka (sida magaca, da'da, taariikhda dhalashada, cinwaanka)
 - Cudurada
 - Dhaawacyada
 - Xaaladaha
 - Xasaasiyada
 - Daawooyinka
 - Natijjooyinka baaritaanka shayaarka
 - Warbixinnaa shucaaca
 - Guudmarada daryeelka bukaanka
 - Qoraallada dhakhtarka
 - Macluumaadka caafimaadka maskaxda ee xaddidan*
 - Macluumaadka xaddidan ee isticmaalka maandooriyaha* (oo sidoo kale loo yaqaano balwad)

* Diiwaanada ku saabsan caafimaadka maskaxda iyo daaweynta cudurada isticmaalka maandooriyaha ee laga heley qaar ka mid ah xarumaha daryeelka aasaasiga ah, waaxaha xaaladaha degdega, iyo isbitaalada ayaa lagu dari karaa. Diiwaanadan waxaa ku jiri kara baadhitaanada iyo dawooyinka dhakhtarka uu qoro. Waqtigaan, xarumaha dhakaatiirta cilmu-nafsiya ee gaarka ah, la-taliyayaasha caafimaadka dhimirka iyo xarumaha daaweynta cudurada isticmaalka maandooriyadaqeyb kama aha Shabakada Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka ee Vermont.

Wixii intaa ka badan, booqo VTHealthInfo.com/FAQS

Shabakada Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka ee Vermont waxaa maamula Hoggaamiyeasha Teknolojiyada Macluumaadka ee Vermont (VITL) waxaana maalgeliya Gobolka Vermont maadaama uu yahay adeeg loogu talagalay dhammaan dadka degan Vermont. Wixii dheeraad ah oo ku saabsan VITL, booqo VITL.net



Taasi maxay iiga dhigan tahay?

In dhakaatiirtaada iyo adeeg bixiyeyaashaada daryeelka caafimaad ay haystaan macluumaad isku mid ah oo adiga kugu saabsab waxay ka dhigan tahay daryel wanaagsan oo aad hesho.

Marka adeeg bixiyayaashu ay isticmaalaan Shabakada Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka, waxay marin u heli karaan diiwaano la wadaago. Taas macnaheedu waa inaadan u baahan doonin inaad ka jawaabto su'aalo isku mid ah meel walba oo aad tagto. Ama inaad xasuusato goorta ay wax dhaceen. Ama inaad sida saxda ah u ogaato nooca dawada aad qaadatay. Haddii ay dhacdo inaadan marna bixin karin macluumaadkaaga, sida haddii ay jirto xaalad degdeg ah, dhakhtarka ayaa weli heli kara macluumaad muhiimka ah si uu kuu caawiyo.



VTHealthInfo.com

Wixii su'aalo ah, Khadka Tooska ah ee Shabakada Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka ka wac taleefanka 1-888-980-1243.